Baaritaanka aan calaamadaha laheen ee iskuulada iyo kulliyadaha - Su'aalaha badanaa la is weydiiyo.

Maxay dawladu u fulinaysaa barnaamijkan baaritaanka ah?

Baaritaanka aan calaamadaha laheen ee iskuulada iyo kulliyadaha - Su'aalaha badanaa la isweydiiyo.

Maxay yihiin ujeedooyinka istiraatiijiyadda baaritaanka aan calaamadaha laheen ee goobaha waxbarashada?

Baaritaanka wuxuu gacan ka gaysan doonnaa inaan jebinno silsiladaha gudbinta coronavirus. Barnaamijka baaritaanka degdega ah ee dugsiyada sare iyo kuliyadaha wuxuu naga caawin doona in la ogaado kiisaska aan astaamaha lahayn. Kuwa laga helay kiisaska gooni ayay isku karantiili doonaan, iyagoo nagu caawin doona in ardayda kale ay ka faaidaystaan waxbarashada fool-ka-foolka ah.

Maxaad u sameyneysaa baaritaan hal mar ah bilowga Janaayo?

Barnaamijkan baaritaanka ah waxaa loogu talagalay in lagu baaro inta badan ardayda dugsiga sare iyo kuwa jaamacadda sida ugu macquulsan maadaama ay dib u bilaabayaan waxbarashadooda bisha Janaayo si loo ogaado kiisaska aan astaamaha lahayn.

Baaritaanka degdegga ah iyo is karantiilka kuwa laga helay kiisaska waxay ka hortagaysaa shakhsiyaadka qaba infekshinka iyada oo aan la ogeyn oo laga yaabo in ay ku faafiyaan iskuulka/kuleejka ama bulshada inteeda kale. Waxay sidoo kale caawin doontaa waxtarka barnaamijka baaritaanka coronavirus-ka ballaaran ee ay Dowladu dejineyso.

Maxay tahay sababta baaritaanka degdegga ah ee aan astaamaha lahayn loo bilaabayaa hadda?

Seddexdii qofba mid ayaa qaba feyraska astaamaha lahayn (waa astaamo la'aan) sidaa darteed qofka wuu faafin karaa cudurka isagoon ogayn.Tikniyoolajiyada cusub oo oggolaaneysa baaritaanka degdegga ah waxay ka dhigan tahay inaan hadda bilaabi karno baaritaanada ugu horreeya ee shaqaalaha iyo ardayda kuwaas oo laga yaabo inay astaamo lahayn, ka dib baaritaan maalinle ah ayaa lagu samayn doonaa shaqaalaha ama ardayda la ogaado inay xiriir la leeyihiin. Baaritaanka dadka la ogaaday inay xiriir la sameeyeen dadka kiisaska laga helay waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaysan u baahnayn in la karantiilo oo ay sii wataan waxbarashada fool-ka-foolka ah.

Tani waa horumar wanaagsan oo gacan ka geysan doona in si dhakhso leh lagu garto kiisaska lahelay, jebinta silsiladaha gudbinta iyo in la yareeyo khalkhalka ay iskuulada, kulliyado iyo arday badan soo mareen bilihii la soo dhaafay. Iskuulada iyo kulleejooyinka ayaa sii wadi doonaan dejinta tallaabooyin dhowr ah oo kahortag ah ah si loo yareeyo halista cudurka safmarka sidoo kale baaritaanka toddobaadlaha ee shaqaalaha waxay iyadana kordhin doontaa kalsoonida ay

shaqaalaha ku qabaan goobta shaqada.

Carruurta iyo dadka da'da yar kuwaas oo ku jiraan kooxda caafimaad ahaan aadka u nugul waa inay joogteeyaan raacitaanka Tilmaamaha ku saabsan kahortaga iyo ilaalinta dadka aadka u nugul.

Soo noqoshada Janaayo

Maxay dib ugu dhacday ku soo laabashada dugsiga sare iyo kuleejka?

Heerarka infekshinka sii kordhaya iyo gudbinta sii badanaysa ee ardayda barata dugsiga sare iyo ardayda kale, waxaa muhiim ah in la sameeyo wax kasta oo suurtagal ah si gacan looga geysto wax ka qabashada isbeddelladan iyada oo mudnaanta la siinayo waxbarashada. Baaritaanka tirada badan waxay noo oggolaanaysaa inaan ogaano kiisaska aan astaamaha lahayn iyo in la jaro khadadka gudbinta Dib u dhigista ardayda bankooda iyo inay si buuxda ardayda ugusoo laabtaan waxbarashada fool-ka-foolka ah illaa 18-ka Janaayo waxay siinaysaa dugsiyada sare iyo kuliyadaha waqti dheeri ah oo lagu diyaariyo laguna xaqiijiyo in baaritaano tiro badan lasameeyo.

Waa maxay qorshaha Dowladda ee ku aadan soo noqoshada Janaayo?

Xaruumaha aasaaska u ah

Meelaha dalka oo kiisaska ama gudbinta fayraska ay aad ugu badan tahay, Dowladdu waxay qaadatay go'aanka ay ugu yeereyso Qaabdhismeedka Xaaladda Waxbarashada, taasoo macnaheedu yahay in qaar ka mid ah dugsiyada hoose ay dib u dhigaan soo noqoshada ardayda badankood muddo labo toddobaad ah.

Meelaha aan laga bilaabin Qaabdhismeedka Fudud, kooxaha sanadka koowaad waxay ku soo laaban doonaan sidii caadiga ahayd laga bilaabo bilowga teeramka iyo daryeelayaasha carruurta la jooga (quraacda iyo naadiyada iskuulka ka dib) waxay ku soo laaban karaan bilowga teeramka sida la qorsheeyay.

Baahiyaha gaarka ah iyo Waxbarashada iskuulka ka baxsan.

Dhammaan carruurta iyo dadka da'da yar waxay ku laaban karaan waxbarashada fool-ka-foolka ah ee iskuulada gaarka ah, Waxbarashada iskuulka ka baxsan iyo xaruumaha gaarka ah ee dadka 16-ka ween waxay ikhtiyaar u leeyihiin inay waalidiinta kula heshiiyaan in shaqsiyaadka ardayda ah ay guriga joogi karaan, haddii ay taasi ku habboon tahay. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkan: Baaritaanka tirade badan ee aan astaamaha lahayn ee goobaha takhasuska leh - GOV.UK (www.aov.uk)

Dugsiyada sare iyo kuliyadaha FE

Dugsiyada sare iyo Kulliyadaha waa in ay si tartiib ah u soo celiyaan ardaydooda waxbarashada si loo siiyo waqti dheeri ah oo ay ugu diyaar garoobaan laabashada baaritaanka degdegga ah ee

ardayda dugsiga sare bartaan iyo ardayda kale si loo ogaado kiisaska astaamaha lahayn iyo si loo jabiyo silsiladaha gudbinta, ka hor inta aan si buuxda loogu soo laaban 18 Janaayo.

Laga bilaabo 4ta Janaayo, dugsiyada sare iyo kuliyadaha waa inay siiyaan imtixaan kooxaha sanadka oo waxbartaan qaab oonleen ah kaas oo u dhigma waxa ay ku bartaan fasalka isla markaana waa in ay siiyaan waxbarasho fool-ka-fool ah kuwa nugul iyo carruurta shaqaalaha muhiimka ah. Looma baahna inay siiyaan, in kastoo ay suurtagal tahay, waxbarasho oonleen ah kooxaha sannadaha kale.

Toddobaadka labaad ee teeramka, laga bilaabo 11-ka Jannaayo, dugsiyada sare iyo Kulliyadaha waxay bixin doona waxbarasho oonleen ah taas oo u dhiganta waxa ay ku bartaan fasalka waxayna diiradda saari doonaan baaritaanka ardayda ugu badan ee suurtogalka ah, ayadoo mudnaanta la siinayo shaqaalaha iyo ardayda joogaan iskuulka ama kuliyadaha iyo kooxaha imtixaanka sanadka samayn rabaan. Waxay bilaabi doonaan ku soo celinta ardayda waxbarashada si tartiib tartiib ah, ayadoo lagu bilaabayo kooxaha imtixaanka sannadka laga rabo.

Dhammaan ardayda dhigata dugsiyada sare iyo Kulliyadaha waa inay kusoo noqdaan waxbarashada fool-ka-foolka ah 18 Janaayo.

Goorma ayay u samayn doonaan iskuulada iyo Kulliyadaha ardayda iyo shaqaalaha baaritaanka degdega ah ee aan astaamaha lahayn.

Iskuulada iyo kulleejooyinka way furnaan doonaan laga bilaabo 4ta Janaayo si ay u helaan xirmooyinka aaladda baaritaanka (LFD) iyo Qalabka Badbaadinta Shakhsiga (PPE) iyo si looga diyaar garoobo baaritaanka guud ee goobahooda waxbarashada. Iskuulada iyo Kulliyadaha sidoo kale waxay u furnaan doonaan dadka da'da yar iyo carruurta shaqaalaha horjoogayaasha muhiimka ah laga bilaabo 4ta Janaayo.

Toddobaadkan ugu horreeya, baaritaanka toddobaadlaha ah ee shaqaalaha waxbarashadu waa inuu bilawdaa sida baaritaanka ardayda barata dugsiyada sare iyo ardayda dhigata Kulliyadaha labada toddobaad ee ugu horreeya. Waaxda Waxbarshada waxay rajaynaysaa in dugsiyada sare iyo kuliyadaha kala duwan ay mudnaanta siinayaan baaritaanka ardayda ugu nugul, oo ay kujiraan kuwa leh baahiyo dheeri ah.

Laga bilaabo usbuuca 11-ka Janaayo, waa in la bilaabo baaritaanka dhammaan ardayda barata dugsiga sare iyo ardayda.Tani waxay isugu jirtaa laba baaritaan oo LFD ah, oo lagu sameeyo goobta waxbarashada, oo ay u dhaxeyso 3-5 maalmood iyo ka hor inta aan si buuxda loogu laaban waxbarashada fool-ka-foolka ah 18-ka Janaayo.

Shaqaalaha waa la baari doonaa toddobaad walba. Ardayda, iyo xubnaha shaqaalaha oo la ogaaday inay xiriir dhow la leeyihiin kiisaska laga helay goobta waxbarashadda waxay mari doona baaritaano taxane/maalinle ah. Tani waxay u oggolaaneysaa inay sii wataan imaanshaha goobaha waxbarasho haddii maalin walba laga waayo kiis.

Waa maxay istiraatiijiyada Dawladda ku aadan baaritaanka aan astaamaha lahayn ee goobaha waxbarashada?

Baaritaanka Tirada Badan

Seddexdii qofba mid ayaa qaba viruska aan astaamahalahayn (waa astaamo la'aan) sidaa darteed qofka wuxuu gudbin karaa fayraska isagoon ogayn. Taasi waa sababta baaritaanka dadka aan astaamaha lahayn uu gacan uu ka gaysan karo goobaha waxbarashada. Ogaanshaha kiisaska la helay waxay gacan ka geysan doontaa in la jabiyo silsiladaha gudbinta. Barnaamijka baaritaanka wuxuu ka kooban yahay ardayda dugsiga sare iyo ardayda FE iyo kuwaas oo markii hore qaadanayeen laba baaritaan oo LFD ah.

Iskuullada iyo Kulliyadaha wali ma laga filayaa inay keenaan baaritaan hal mar ah, goorma ayeyna tani dhacaysaa?

Rajadu waxay tahay in dhammaan dugsiyada sare iyo Kulliyadaha ay u isticmaali doonaan usbuuca 4ta Janaayo si loogu diyaariyo baaritaano fara badan. Laga bilaabo 11-ka Janaayo, laba baaritaan oo degdeg ah ayaa loo samayn doonaa dhammaan ardayda si loo ogaado kiisaska aan astaamaha lahayn.

In si dhakhso leh lagu ogaado loona helo kiisaska aan astaamaha lahayn waxay kahortagaysaa in shakhsiyaadka ay qaadaan cudurka iyagoon Hogan kuwaas oo laga yaabo inay ku faafiyaan bulshada deegaanka. Waxay sidoo kale caawinaysaa waxtarka barnaamijka balaaran ee coronavirus ee ay dowladu dejineyso.

Baaritaanka halka mar sidee buu u shaqeyn doonaa?

Dhammaan ardayda dhigata dugsiyada sare iyo kulliyadaha FE waxaa la siin karaa baaritaanka ququlka dinacyada laga bilaabo 11ka Janaayo. Ardayda dugsiga sare iyo ardayda kuliyadaha FE waxay loo samayn doonaa laba baaritaan oo LFD ah oo u dhexeysa 3-5 maalmood. LFD-yada la bixiyay uma baahna shaybaar in lagu sameeyo waxayna ku siin karaan natiijo deg deg ah illaa saacad.

Shakhsiyaadka kiisaska laga helay waxaa laga rabaa inay si gooni ah isku karantiilaan iyadoo la raacayo hagidda guri-jooga ee loogu talagalay qoysaska dadka la xaqiijiyay misa macquulka tahay inay qabaan cudurka coronavirus' (COVID- 19). Ardayga, ama shaqaaluha iskuulka waxaa laga rabaa inay markaa sameeyaan baaritaan PCR Xaqiijin ah si loo sugo natiijada kiiska la helay. Baaritaano dheeri ah oo PCR ah ayaa loo diri doonaa iskuulada iyo Kulliyadaha si loo siiyo qof kasta oo laga helay kiis si loogu taageero helitaanka degdegga ah ee baaritaanka xaqiijinta.

Baaritaanka qasab ma aha, arday kasta oo aan rabin in uu qaato labada baaritaan ee LFD bilowga xilliga gu'ga lagama rabo inuu keeno natiijada kiisaska baaritaanka, ama caddeyn tusaysa in uu baaritaan qaatay, si uu ugu laabto waxbarashada foolka foolka ah 18-ka Janaayo. Si kastaba ha noqotee, baaritaanka si adag ayaa loo dhiirrigelinayaa.

Siduu yahay waxtarka baaritaanka ququlka aaladda dhinacyada?

Baaritaanka ququlka ee dhinacyada waa kuwo aad u saxan, taas oo macnaheedu yahay in kaliya tiro aad u yar oo ah dadka aan qabin coronavirus ay heli doonaan natiija been ah (been abuur).

Haddii kiis lagaaga helo baaritaanka ququlka dhinacyada, waxay u badan tahay inaad infakshan qabtid waqtigaas. Adoo isticmaalaya baaritaanka ququlka dhinacyada waxaan ogaan karnaa dadka qaba culeyska fayraska kuwaas oo ah kuwa ugu badan oo sii faafiya fayraska.

Kuwa aan laga helin kiisaska baaritaanka LFD waa inay wali raacaan heerka kala fogaanshaha bulshada, waa inay xirtaan waji xirka markay haboontahay gacmahoodana si joogto ah waa in ay u dhaqaan.

Iskuulkaygu waan fahmay. Miyaan baaritaan ku sameeyaa caruurtayda dhigata dugsiga hoose?

Maya, barnaamijka baaritaanka tirada badan wuxuu mudnaanta siinayaa ardayda barata dugsiga sare iyo ardayda kulliyadaha; qalabka baaritaanka iyo PPE waxaa lagu bixin doonaa isla halkan. Ogeysiisyo dheeri ah ayaa loo sameyn doonaa si loo baaro kooxaha da'da kale waqti dhaw.

Yaa baaritaanka ku sameyn doona iskuullada iyo kulliyadaha?

Badanaa, ardayda ayagaa is baari doonaan si ay u bixiyaan saambalka baaritaanka. Waxaa jira dhowr hannaan oo laxiriira nidaamka baaritaanka, kuwaas oo lagu qeexay tilmaamaha la daabacay.

Shaqaalaha iskuulada iyo Kulliyadaha waxaa laga rabaa inay taageeraan barnaamijka baaritaanka. Shaqaalaha baaritaanka ee ka maqan waxaa laga yaabaa inay buuxiyaan kuwa mutadawiciin ah iyo shaqaalaha hay'adda. Haddii iskuul ama kulliyad ay ku adkaato dejinta nidaamka baaritaanka, waxaad codsan kartaa taageero dheeraad ah Haddi ay darruuf gaar ah jirto si wax looga qabto arrimaha saadka iyo qorshaynta. Iskuulada iyo Kulliyadaha looma balan qaadi karo qodobkaan - goobaha waxbarasho iskuulada ka baxsan waxaa loo qiimeyn doonaa iyadoo kiis-kiis loo baarayo. Dhammaan dugsiyada sare, kulliyadaha iyo dugsiyada gaarka loo leeyahay waxay xaq u yeelan karaan maalgelin dheeri ah oo loogu talagalay taageerada shaqaalaha. Dhamaan iskuulada kale ee madaxa banaan xaq uma lahaan doonaan.

Imisa qalab baaritaan ah ayaa la geyn doonaa iskuulada iyo kuliyadaha iyo intee jeer oo dheeri ah baana la siin doonaa?

Tirada qalabka baaritaanka ee iskuul kasta heli doono waxaa lagu qiimeeyay tirada macalimiinta iyo ardayda iyo waxyaabaha laga filayo baaritaanka maalinlaha ah/taxanaha ah ee ku saleysan badnaanshaha. Iskuulada iyo Kulliyadaha waxay heli doonaan laba xirmooyin horaanta Janaayo 2021. Xirmada ugu horeysa waxay ku imaan doontaa Royal Mail. Qalabka baaritaanka ah iyo PPE waxaa loogu talagalay barnaamijka baaritaanka hore. Xirmada labaad, iskuulada iyo Kulliyadaha waxay heli doonaan xirmooyinka baaritaanka iyo PPE ee usbuuclaha ah kaas oo loogu talagalay shaqaalaha iyo dadka ay xiriiraan maalin walba /baaritaanka taxanaha ah. Waad dalban kartaa xirmooyinka baaritaan dheeri ah iyo PPE inta lagu jiro mudada baaritaanka sidii loogu baahdo iyo macluumaadka ku saabsan sida dib loogu dalbado in yar waan idin la wadaagi doonaa waxyar kadib. Waa inaad heshaa xirmooyinka baaritaan oo kugu filan iyo PPE ugu yaraan 2 toddobaad.

Ma inaan dooranaa si aan u helno xirmooyinka qalabka baaritaanka ah?

Iyada oo qayb katahay tilmaamaha howleed, DHSC waxay dejin doontaa heshiis sharci ah kaas oo leh xeerar iyo shuruudo oo iskuulada iyo Kulliyadaha ay dooran doonaan iyaga oo si fudud u oggolaanaya ka

qeyb qaadashada barnaamijka baaritaanka. Majiraan talaabooyin qaas ah oo loo baahan yahay si loo helo xirmada ugu horreysa ee qalabka baaritaanka. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan dhib u bixinta xirmooyin kale ayaa la samayn doonaa.

Maxaa dhacaya haddii iskuulka/kuleejku ka hawlgalo goobo kala duwan?

Waxay noqon doontaa iskuullada/kulliyadaha noocan oo kale ah inay go'aan ka gaaraan inay hal meel ku sameeyaan baaritaanka ama inay baaritaan joogta ah ku sameeyaan goob walba oo ka mid ah goobahooda. Waxaan ku dhiiri gelin lahayn in baaritaan lagu sameeyo goob kasta si ay ugu fududaato sida ugu macquulsan ee ardayda inay baaritaan uhelaan.

Is baaritaanka

Adeegga baaritaanka ee hadda jira weli ma furnaan doonaa?

Adeegga baaritaanka caadiga ah ee Dowladda ee shakhsiyaadka astaamaha lagu arkay wuu sii socon doonaa. Tani waa aasaaska istiraatiijiyadeena baaritaan. Waa habka ugu wanaagsan ee lagu ogaan karo haddii aad fiicantahay oo wilina u baahan tahay in aad is karantiishid. Haddii aad isku aragto astaamo, waa inaad dalbataa baaritaan adoo isticmaalaya adeegga NHS Coronavirus (COVID-19) ama adigoo wacaya 119 England iyo Wales, ama 0300 303 2713 Scotland iyo Waqooyiga Ireland.

Sidee uga hortagi kartaa in la ceebeeysto kuwa doortay inayna ka qaybqaadan ama kuwa kiisaska laga helay xiliga baaritaanka iskuulka/ kuleejka asxaabta hortooda?

Natiijooyinka baaritaanka waa in loogu sheegaa ardayda iyo shaqaalaha si gaar ah meel kasta oo suurtagal ah.

Qoyskeygana ma laga rabaa inay is baaraan?

Maya, baaritaanka waxaa loogu talagalay shaqaalaha iyo ardayda wax kabarata iskuulada iyo kuliyadaha iyadoo ujeedadu tahay in iskuulada iyo kuliyadaha sii furnaadaan oo ardeyda ay wax ku bartaan fool-ka-fool. Xubnaha qoyska ee ardayda iyo shaqaalaha ka qayb qaadanaya xaq uma laha. Haddii xubnaha qoysku ay isku arkaan astaamaha COVID-19, waa inay raacaan tilmaamaha dawladda ee caadiga ah, oo ay karantiil galaan isla markiiba iyo dalbashada baaritaan iyada oo loo marayo adeegga NHS Coronavirus (COVID-19) ama iyada oo la wacayo 119 (England iyo Wales).

Waa maxay sababta aniga oo (ardayga /shaqaalaha) la ii baarayaa haddii (ardayga /shaqaalaha) aan (a) lahayn calaamado?

Baaritaanka ququlka geesaha waxaa loogu talagalay in lagu ogaado heerka fayraska ee shakhsiyaadka aan ku dhicin oo aan muujin wax calaamado ah, laakiin kuwaas oo wali faafin karaan oo u gudbin karaan fayraska kuwa kale. In la baaro, waxay gacan ka geysan doontaa sidii loo joojin lahaa faafitaanka fayraska, loo ilaalin lahaa dadka kale, loona badbaadin lahaa nolosha dadka. Tani waxay sidoo kale ka micna tahay in shaqaaluhu sii wadan karaan shaqada, iskuulada iyo Kulliyadaha way ka badbaadayaan

shaqaalaha yarida ee aan loo baahnayn, ardayduna way sii wadan karaan waxbarashadooda fool ka foolka ah.

Oggolaansho

Maxaa dhacaya haddii iskuulka aan heli karin oggolaansho ilmahana u soo xaadiro iskuulka?

Ka-qaybgalka barnaamijka wuxuu u baahan yahay oggolaansho sugan oo laga helo qofka la baarayo, ama, haddii ay ka yar yihiin 16, waalidkood ama/wakiilkooda sharciga ah. Shaqaala kasta oo xubin ka ah, ama arday ah oo aan kaqaybqaadan baaritaanka wuxuu wali xaq u leeyahay inuu xaadiro iskuulka ama kuleejka ilaa ay isku arkaan calaamado ama ay si dhow xiriiraan ula yeesheen kiis. Dadka diida inay kaqeyb galaan baaritaanka baaritaanka lagu baadi goobayo dadka xiriirka isla lahaa /baaritaanka taxanaha ah waa inay raacaan tilmaamaha qaranka caadiga ah waana inay is karantiilaan muddo toban maalmood ah.

Ma u baahan tahay oggolaansho si aad uga shaqeyso xog shaqsiyeedka looga baahan yahay baaritaanka?

Dugsiyada sare iyo Kulliyadaha waxaa laga rabaa inay buuxiyaan shuruudaha sharciga aasaasiga ah oo lagu isticmaalo xogta shakhsiga. Waajibaadka ku qoran sharciga waxbarashada ee dugsiyada sare iyo Machadyada FE ayaa u baahan inay qorsheeyaan ilaalinta baahida iyo dhiirrigelinta daryeelka ardayda ayaa laga yaabaa inay siiyaan sharci aasaas ah oo ku filan ayagoo ka maarmaan inay ku tiirsanaadaan ogolaanshaha. Dugsiyada iyo Kulliyadaha waxay siin doona shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta ogeysiis qarsoodi ah oo sharraxaya macluumaadka shakhsiyeed ee looga baahan yahay in lagu isticmaalo barnaamijka.

Shaqaalaha

Shaqaalaha mutadawiciinta ah malaga rabaa baaritaanka DBS?

Iskuulada iyo Kulliyadaha waa inay u hoggaansamaan waajibaadkooda sharciga ee ku saabsan xaqiijinta tijaabada hordhaca ah markay istcmaalayaan shaqaalaha hay'adda, qandaraasleyda, iyo mutadawiciinta si ay u taageeraan baaritaanka. Badanaa, haddii aad ku lug leedahay nidaamka baaritaanka, ama haddii aad wakhti kasta la joogto carruurta aan la kormeerin, markaa waxaa lagaa rabaa inaad qaadato baaritaanka DBS. Haddii aad tahay shaqaale mutadawic ah laakiin aadan ka shaqa kulaheen sameenta baaritaanka (tusaale ahaan, haddii horaan laguu tababaray inaad u fidiso taageero ilmo aan iskiis isu maamuli karin), oo lagaa kormeeri jiray carruurta /dadka da'da yar waqti kasta, markaa lagaama rabo baaritaanka DBS.

Waa lagama maarmaan in shaqaalaha hay'ada, qandaraasleyda iyo mutadawiciinta si ku habboon loo taageero loona siiyo kaalin ku habboon. Iskuulka ama kulliyada waa inay yareeyaan isku-qaska mutadawiciinta, shaqaalaha hay'adda iyo qandaraaslayaasha ee kooxaha oo dhan, waana inay ka fogaadaan 2 mitir ardayda iyo shaqaalaha hadday suurogal tahay.

Ma ka dhihi kartaa inta taageera militari ee la heli doono iyo sida ay u caawin doonto?

Nooca taageerada wuxuu ku xirnaan yahay shuruudaha iskuulada sare iyo kulliyadaha shaqsiyeed. 1,500 oo shaqaale millatari ah ayaa diyaar u ah inay taageeraan dugsiyada iyo kulliyadaha. Waxay kusii nagaan doonaan hawsha, iyagoo siinaya tababaro la taaban karo iyo talooyin ku saabsan aasaasida nidaamka baaritaanka, iyadoo kooxaha heegan ugu jiraan inay siiyaan taakuleyn shaqsiyeed haddii looga baahdo iskuulada iyo kuliyadaha. Iskuulada iyo Kulliyadaha waxay codsan karaan taageeradan dheeriga ah iyada oo loo marayo khadka caawinta DfE.

Qaar ka mid ah shaqaalaha militariga waxay siin doonaan taageero fog dugsiyada iyo kuliyadaha leh qorsheyn istiraatiijiyadeed, iyagoo ka caawin doona waxyaaba la taaban karo ee samaynta baaritaanka tirada badan. Taageeradan waxaa ka mid noqon kara ka jawaabida su'aalaha ku saabsan dejinta iyo maamulka goobta baaritaanka ballaaran ee iskuulka weyn. Xaaladaha kale, Wasaaraddu waxay ku talo jirtaa inay 'dhulka ku bixiso' taageero milatari oo lasiinaayo iskuulada iyo kulliyadaha si ay uga caawiso dejinta goobo baaritaano meelahaas oo baaritaanka haddii kale uusan ka sii socan lahayn. Iskuulada iyo Kulliyadaha waxay codsan karaan taageeradan dheeriga ah iyada oo loo marayo Khadka Caawinta DfE.

Maxaa kale oo taageero shaqaale ah oo lasiin karaa iskuulkayga ama kulliyaddayda?

Sidoo kale helitaanka lacagta shaqaalaha iyo taageerada militariga, waxaa jira fursado kale oo ay heli karaan iskuulada iyo Kulliyadaha si ay u taageeraan baaritaanka shaqaalahooda.

- Taageerada ardayda aan awoodin inay isbaaraan waxaa laga heli karaa khadka caawimaadda ee DfE. Taageerada caafimaadka waxaa waxaa lasiin doonaa caruurta iyo dhalinyarada kuwaasoo baahidooda jir ahaaneed iyo tan caafimaadka ka hortaagan inay galaan baaritaan, iyo halka waalidiinta iyo/ama shaqaalaha iskuulka sii joogay aysan caawin karin.
- Taageerada hogaanka waxaa lagu bixin doonaa iyada oo loo marayo Ofsted HMIs ama asaaga ah si loo caawiyo dhalinyarada u dhexeeya iskuulada.
- Wadooyinka ganacsiga ee shaqaalaynta qaababka kumeelgaarka ah iyo kuwa aan kiliinikada lahayn waxaa lagu heli karaa qaabab kala duwan oo jira. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan 'Sida Loo Iibsado' mid kasta oo ka mid ah qaababkan waxaa lagu daabici doonaa Barta DfE.
- Helitaanka shaqaalaha mutadawiciinta ah. Iskuulada iyo Kulliyadaha waxay isticmaali karaan shaqaalaha mutadawiciinta ay haddaba heli karaan (waalidiin mutadawiciin ah, guoomiyaasha iskuulka, kuwa iskaa wax u qabso ku shaqeeya ee aagagga kale ee iskuulka/kulliyada) ama kala xiriir shaqaalaha mutadawiciinta adigoo adeegsanaya mid ka mid ah shabakadaha qaranka sida Do.it.org ama Reach Volunteers. Xarumaha Mutadawacnimada sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa in lagula xiriiro shaqaalaha mutadawiciinta, iskuulada iyo Kulliyadahana waxay ka heli karaan xaruntooda maxaliga ah iyaga oo adeegsanaya koodhka shaqa raadinta boostada ee Xarunta Qaranka ee Ururada Iskaa Wax U Qabso ah.

Isuulkayga ama kulliyadayda miyaa loo soo celiyaan kharashka?

Iskuulada iyo kuliyadaha waxay heli doonaan lacag si looga taageero kharashaadka baaritaanka ka galay. Waxaan diyaarinay £ 78m si aan ugu taageerno iskuulada iyo kulliyadaha baaritaankii ugu dambeysay. Tan waxaa lagu bixin doonaa ayadoo dib loo fiirinaaya. Qiyaasta maalgalinta ee laga heli karo iskuul ama kuleej waxay ku xirnaan doonta intay la egtahay maadaama tani ay saameyn ku yeelan doonto tirada

shaqaalaha dheeraadka ah ee looga baahan yahay inay ku sameeyaan baaritaanka. Waxaan diyaarinay **qalabka qorsheynta shaqaalaha** kaasoo sheegi doona shuruudaha shaqaalaha iyo maalgelinta la xiriirta. Qalabku waxaa loogu talagalay inuu qiyaaso maalgelinta uu iskuulka heli karo. Qoondada maalgelinta dhabta ah waxaa asal u ah xog celinta la bixiyay iyada oo loo marayo 'Tirakoobka Iskuulada Dayrta 2020' iyo soo noqoshada Diiwaangalinta Shakhsiyaadka Gaarka ah (ILR) R04 ee sanadka 2020 ilaa 2021. Hay'adda Maalgelinta Waxbarashada iyo Xirfadaha (ESFA) ayaa si toos ah u bixin doonta lacagaha la siiyo hay'adaha bixiya bilowga soo-saarista ee baaritaanada tirada badan ee degdegga ah.

Maxaa loo isticmaali karaa maalgelinta?

Waaxda waxbarashadu waxay haminaysaa in kharashka aasaasiga ah ka baxay uu noqon doono kharashyada shaqaalaha ee dheeraadka ah, laakiin iskuulada iyo Kulliyadaha waxay leeyihiin ikhtiyaar ku saabsan kharashka si ay iskaga bixiyaan kharashyada kale ee macquulka ah baaritaanka. Kharashaadka dheeraadka ah ee laxiriira waxaa kamid noqon kara:

- Kharashaad yar oo lama filaan ah, sida daabacaadda, waraaqaha / qalabka xafiisyada, qalabka nadaafadda / qalabka, tiishka, iyo masaxaada, iwm. iyo
- Kharashaadka dheeriga ah oo qashinka lagu nadiifiyo ayaa lasiiyay maadaama mugga qashinka badan laga yaabo in laga soo saaro meelaha baaritaanka (tusaale ahaan, qalabka baaritaanka LFD, qashinka PPE , tiishashka, xaashiyaha, iwm).

Shirkadaha caymiska ee lashaqeeya iskuulada iyo Kulliyadaha, oo ay kujirto Qorshaha Halista Qabanqaabada (RPA), ma xaqiijiyeen inay dabooli doonaan dhammaan howlaha laxiriira barnaamijka baaritaanka tirada badan?

RPA-da ayaa magdhaw siin doonta qaybaha haddii dacwad ay keeneen dhinacyada muuqda (oo ay ku jiraan ardayda) ama shaqaalaha. Waxay daboolaysaa dhimashada ama dhaawaca, ama burburka soo gaadhay hantida, taas oo ay ugu wacan tahay iskuulada ama kuliyadaha baaritaanka degdega ah samaynaya.

Waxaa fiicnaan laheed in xarumahan iyo dhamaan iskuulada iyo Kulliyadaha kale ee aan xubnaha ka aheyn RPA, ay la xiriiraan shirkadooda ganacsiga caymiska shaqsiyeed, si ay ugu cadeeyaan qeexida caymiska

Caymiska 'RPA' waxay kuxirantahay shuruucda caadiga ah ee xubinimada RPA iyo shuruudaha, xeerarka, iyo dhibaatada. Waxaa ku jira kharashka lagu ilaalinayo iyo waxyeelada/magdhowda shakhsiga xubinta ka ah uu sharci ahaan u leeyahay inuu siiyo qofka sheeganaya. RPA ma siin doonto magdhaw dhinac kale (tusaale ahaan, soo saaraha mishiinka) haddii kooxda kale ay gasho masuuliyad sharci ah.

Waa shuruud ah in qiimeynta halista la sameeyo, la diiwaangaliyo, loona hoggaansamo. Haddii ay dhacdo khasaaro ama dhaawac soo gaara qalab kasta oo uu ku lahaaday mas'uuliyadda Xubinimada (tusaale ahaan, heshiis kiro ama heshiis kireysi) oo loo adeegsaday bixinta baaritaanka, RPA waxay xubnaha ka siin doontaa magdhow kharashka dayactirka ama beddelaad. Caymiska wuxuu ku xiran

yahay Xeerarka xubinnimada RPA ee caadiga ah (oo ay ku jiraan dhammaan dhibaatada, shuruudaha, iyo xayiraadaha)

Sidee iskuulada iyo Kulliyadaha looga filayaa inay bixiyaan waxbarasho oonleen ah oo ay weheliyaan qaadista baaritaanada tirada badan?

Dugsiyada sare iyo Kulliyadaha waxay ku shaqeyn doonaan soo noqnoqoshada tartiib tartiibta ah, taas oo taageeri doonta waxtarka barnaamijka baaritaanada tirada badan iyo bixinta waxbarasho oonleenka oo tayo sare leh. Waxbarashada oonleenka waxaa la siin doonaa kooxaha imtixaanka sanadka galayaan (yl 1 iyo y13) laga bilaabo 4ta Janaayo iyo ardayda kale laga bilaabo 11ka Janaayo. Tilmaamaha iyo ilaha ku saabsan waxbarashada oonleenka waxaa laga heli karaa halkan - Ka hel caawimaad xagga waxbarashada oonleenka - GOV.UK. Ardayda danyarta ama kuwa waalidkooda shaqaalaha muhiimka ahi way tagi doonaan iskuulka ama kuleejka shaqsi ahaan laga bilaabo teeramka bilowgiisa, sidoo kale dhammaan ardayda dhigata dugsiyada hoose ee gaarka iyo waxbarashada iskuulada iyo Kulliyadaha ka baxsan.

Si loo sameeyo baaritaanka baaxada weyn ee loo baahan yahay waxay ka dhigan tahay iskuulada iyo Kulliyadaha waxaa laga rabaa inay siiyaan xubnaha shaqaale ah si loo taageero barnaamijka. Taageeradani waxay dabooli doontaa toddobada kaalin ee baaritaanka sida ku xusan Buug-gacmeedka iskuulada iyo Kulliyadaha. Wasaaraddu way ogtahay in muhiimada macallimiintu ay tahay bixinta waxbarashada waxayna cadaynaysaa in taasi aysan daruuri ahayn in loogu daro shaqaalaha waxbaridda. Shaqaalaha baaritaanka waxay noqon karaan iskudhaf mutadawiciin ah iyo hawlwadeenno hay'adda ah, oo ay caddeeyeen iskuulka ama kulleejku, sida shaqaalaha tababarka iyo kuwa ku takhasusay baaritaanka. Waaxdu waxay dib u ugu celin doontaa, iskuulada iyo kuliyadaha ay dowladu maalgeliso, iyo iskuulada gaarka loo leeyahay ee madaxa banaan iyo kuwa aan la ilaalin kharashka shaqaalaha ee macquulka ah.

Wasaaraddu waxay ogtahay in hoggaamiyeyaasha iskuulka iyo kulliyada inay awood u leeyihiin dakhliga lagama maarmaanka u ah baaritaanka; taas oo ka socota gudaha iskuulkooda iyo bulshada deegaanka. Wasaaraddu waxay ogtahay in iskuulada iyo kulliyadaha qaarkood aysan awoodin inay helaan shaqaale/mutadawiciin ku filan oo dabooli kara toddobada kaalin ee baaritaanka.

Xaaladahan oo kale haday dhacaan, iskuulka/kulleejadu waa inay la xiriiraan Khadka Caawinta Iskuulada si dacwadooda loo xaliyo. Waaxdu waxay qiimeyn doontaa baahiyaha gaarka ah ee iskuulka ama kuleejka.Meeshii taageero dheeraad ah looga baahdo, Waaxdu waxay diyaar u tahay waxii caawimaad ku habboon ee loo baahan yahay iyadoo loo eegayo xaalada kiis walba. Waxay siin doontaa dakhli dheeri ah iskuuladaas iyo kulliyadaha aadka ugu baahan.

Tababar

Waqti intee la eg ayey u baahan yihiin iskuulka ama kulliyada si ay u qorsheeyaan meesha baaritaanka, dejiyaan goobta, iyo bixinta tababarka shaqaalaha?

Dugsiyada sare iyo Kulliyadaha waxay ka heli karaan macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan tirada shaqaalaha iyo qiyaasta waqtiga iyo booska looga baahan yahay goob kasta oo lagu qabanayo baaritaanka aan astaamaha lahayn, iyo baahiyaha tababarka ee Tilmaamaha soo socda ee baaritaanka aan astaamaha lahayn ee iskuulada iyo Kulliyadaha iyo Buug-gacmeedka iskuulka iyo kulliyadaha . Tusaale ahaan, iskuul ama kulleejo ayaa dhammayn kara 11-13 baaritaan, halkii saac, saacaddii. "Waxaan diyaarinay qalabka qorsheynta shaqaalaha kaasoo sheegi doona shuruudaha shaqaalaha iyo maalgelinta la xiriirta."

Nidaamka Baaritaanka

Kadib baaritaanka LFD - natiijooyinka waxay qaadanayaan ilaa hal saac si loo horumariyo. Ma reebnaa ardayda illaa natiijada laga ogaado, mise dib ayay ugu noqon karaan fasalka?

Marka baaritaanka uu qayb ka yahay baaritaanka caadiga ah ee toddobaadlaha ah ama baaritaanada tirada badan, shakhsiyaadku way ku laaban karaan hawlaha caadiga ah ee iskuulka ama kuleejka. Si kastaba ha noqotee, qof kasta oo lagu baaro baaritaanka maalinlaha ah /taxanaha ah ee barnaamijyada lagu tixraacayo dadka aad xiriirka lasamaysay waxaa laga rabaa inuu ku sugo meel ka hor inta aan loo oggolaan inuu bilaabo howlaha iskuulka/kulliyada caadiga ah illaa ay ka helayaan natiijada kiisaska oo lagu waayay. Meelahan ay ku nastaan waa in loo kala saaraa koox kasta oo xiriir dhow leh oo la nadiifiyaa ka dib markay dhammaantooda baxaan.

Maxaa dhacaya haddii kiis laga helo baaritaanka ququlka geesaha ee ardayga, ama xubin ka mid ah shaqaalaha?

Shakhsiyaadka laga helay kiis baaritaanka ququlka geesaha kadib waa inay is karantiilaan oo ay qaataan baaritaanka xaqiijinta PCR. Haddii baaritaanka PCR kiis laga hela hadana, shaqsigu waa inuu sii wadaa karantiilka oo uu raacaa tilmaamaha Baaritaanka iyo Tixraacida ee NHS. Sidoo kale waa inay u sheegaan iskuulkooda ama kuliyadooda kiiska. Baaritaanka ee xaqiijinta PCR waa muhiim maadaama ay fudadaynaysa tixraacida xiriirka, taas oo yareyneysa faafitaanka cudurka. Haddii shaqsiyan uusan qaadan baaritaanka xaqiijinta PCR, waa inuu iskiis isku karantiilaa toban maalmood waana inuu ogeysiiyaa dadka uu xiriirka la sameeyay inay is-karantiimeeyaan iyadoo la raacayo talooyinka caafimaadka bulshada.

Maxay shaqaaluhu iyo, ardaydu iskood isugu baarii la'yihiin guriga, halkii ay taasi ka dhici lahayd iskuulka?

Shaqadaas way socotaa si loo horumariyo doorashada baaritaana badan, oo ay kujirto ku isticmaalka LFD loogu talagalay guriyaha shaqaalaha iyo ardayda.

Dugsiyada sare iyo kulliyadaha miyaa laga helaa xirmooyinka qalabka baaritaanka PCR loogu talagalay kuwa laga helay kiis baaritaanka LFD kadib?

Qalabka imtixaanka PCR waxaa la siin doonaa dugsiyada sare iyo kulliyadaha. Shakhsi kasta oo qaata LFD wanaagsan waxaa la siin doonaa xirmo tijaabo PCR xaqiijin ah oo ay ku qaadan karto guriga. Looma

rajeynayo inay ku qaataan imtixaanka PCR iskuulka / kuleejka waana inay ku laabtaan gurigooda si ay si gooni ah gooni iskula soocaan.

Goobaha Baaritaanka

Maxaa dhacaya haddii iskuulka ama kulliyada aysan lahayn meel ku habboon oo baaritaankan lagu sameeyo?

Iskuulada iyo kuliyadaha waxay heli doonaan lacag si looga taageero kharashaadka baaritaanka kubaxay. Lacag dhan £ 78m ayaa loo diyaariyay. Waaxda waxbarashadu waxay rabtaa kharashaadka aasaasiga ah ee ku baxa dugsiyada sare iyo kuliyadaha inuu noqon done kharashaadkii dheeriga oo shaqaalaha ku lagu bixin lahaa. Si kastaba ha noqotee, waxay sidoo kale iskaga bixin karaan lacagta wixii kharash dheeraad ah ee aan shaqalaha ahayn ee soo galay si loo bixiyo tan baaritaanka (tusaale ahaan: muraayadaha, ku rakibida maro adag oo ku meel gaar ah rooga si loo fududeeyo nadaafadda; nadiifinta dheeriga ah iyo qaaditaanka qashinka). Meelihii iskuul ama kulliyad ay wali dhibaato ka haysato helitaanka boos ku habboon, waa inay la xiriiraan khadka caawinta si ay ugala hadlaan fursadaha taageerada dheeraadka ah oo laga heli karo.

SEND

Sidee baa baaritaan wadareedka loogu maamuli doonaa marxaalada SEND oo ma waxaa jiri doona taageero dheeraad ah ama qalab loogu talagalay iskuulada gaarka ah ama kuwa leh tirada aadka u badan ee ardayda SEND?

Waaxda waxbarashadu waxay siisay tilmaamaha ku saabsan sida loo sameeya baaritaan wadareedka ee goobaha gaarka ah.

Maxaa tixgelin ah oo la siiyaa maamulida baaritaanka ardayda SEND ama dadka ku dhib qabaa

n isla shaqeynta kuwaas jir ahaan aan awoodi karin inay is maareeyaan waxaana ugu wacan ganaaxa liita ee xirfadaha gawaarida? Kaaliyaha baaritaanka awood ma u leeyahay inuu dadka u sameeyo baaritaan?

Iskuulada gaarka ah iyo Kulliyadaha qaar waxay leeyihiin shaqaale kala duwan si ay u buuxiyaan baahiyaha caafimaad ee ardayda. Shaqaalahani waxay horey u qaateen tababaro kala duwan si ay u taageeraan baahiyaha caafimaadka waxayna ku caawin karaan isbaarista kuwa aan is maamuli karin. "Taakulaynta ardayda aan awoodin inay is-baaraan waa la heli karaa.Taageerada caafimaad waxay noqon kartaa carruurta iyo dhallinta yar ee baahiyaha jirkooda iyo caafimaadkoodaba ay ka horjoogsanayaan inay qaataan baaritaan, iyo meelaha waalidku iyo / ama shaqaalaha iskuulka ee hadda jira aysan caawin karin."

Ka waran ardayga qaba SEND oo aan awoodin inuu maareeyo is-baaritaanka kuwaas oo bartaan iskuulka Dadweynaha?

Taageerada ardayda aan awoodin inay isbaaraan waa la heli karaa haddii aysan jirin shaqaale ku habboon samaynta baaritaanka. Taageerada caafimaadka waxay noqon kartaa caruurta iyo dhalinyarada ee baahuyahooda jirka iyo tan caafimaadkooda ay ka reebayaan inay isbaarista, waalidiinta ama shaqaalaha iskuulka joogana aanan caawin karin.

Xaaladaha qaarkood, shaqsigu wuxuu u baahan karaa qof weyn oo lagu kalsoon yahay oo jooga goobta si uu u kormeero is-baarista. Goobta sidoo kale waxaa laga yaabaa inay tixgeliso haddii ay u oggolaanaysa markay jiraan duruufaha gaar ah waalidka imanaya goobta si uu ugu caawiyo ilmahooda is-baarista ama u baaritaanka. Tani waxay noqon kartaa macquul ah marka la samaynayo baaritaanka cunug ama qof dhalinyaro ah oo naafo ah, tusaale ahaan.

Ma jiri doonaa baaritaan mudnaan u leh ardayda SEND?

Barnaamijka baaritaanka aan astaamaha lahayn wuxuu gacan ka geysan doonaa furitaanka goobaha waxbarashada iyo in la xaqiijiyo inta badan ee suurtogalka ah in ay helaan waxbarasho tayo sare leh oo foolka fool-ka-fool ah iyago jabinaaya silsiladaha gudbinta fayraska. Waaxdu waxay rajeyneysaa in iskuulada iyo Kulliyadaha ay mudnaanta siiyaan ardayda ugu nugul, oo ay ku jiraan kuwa qaba baahiyaha dheeriga ah.

shaqaalaha sidee loogu qeexaa iskuulada gaarka ah?

Shaqaalaha waxbarashada waxaa ka mid ah dhamaan shaqaalaha fadhigoodu yahay iskuulka/ kuleejka. Iskuulada iyo Kulliyadaha waa inay sidoo kale u sameeyaan baaritaan xubnaha kale ee shaqaalaha, sida kalkaaliyaasha caafimaadka, dhakhaatiirta , ama shaqaalaha kale ee idin caawiya. Qaar ka mid ah shaqaalaha (gaar ahaan kuwa ka shaqeeya NHS) waxaa macquul ah inay leeyihiin qorsheyaal gooni ah oo loogu talagalay baaritaanka joogtada ah.

Qalabka

Qalab noocee ah misa agab ayaa dugsiga sare ama kuleejku u baahan doonaa inuu bixiyo?

Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan agabka ay iskuulada iyo Kulliyadaha laga raba inay ka keenaan oo diyaariyaan si ay u caawiyaan goobaha baaritaanada aan astaamaha lahayn waxay ku qoran tahay Tilmaamaha hawlgalka ee baaritaanka aan astaamaha lahayn ee iskuulada iyo kulliyadaha iyo Buug-gacmeedka Iskuulada iyo Kulliyadaha.

Goorma ayaa la bixin doonaa qalabka baaritaanka /PPE, sideena loo bixindoonaa-maxaa la bixin doonaa iyo sidee kaydka dib loogu buuxin doonaa?

Iskuulada iyo Kulliyadaha waxaa marka hore lasiin doonaa laba nooc oo ah qalabka loo yaqaan 'PPE' iyo qalabka baaritaanka. Xirmooyinka ugu horeeya waxay ku imaan doonaan Royal Mail markay tahay 4 Janaayo. Qalabkaan baaritaanka ah iyo PPE waxaa loogu talagalay barnaamijka baaritaan wadareedka. Xirmooyinka labaad, iskuulada iyo Kulliyadaha waxay heli doonaan qalabka baaritaanka iyo PPE ee usbuuclaha shaqaalaha iyo baaritaanka maalinlaha/wadareedka oo lagu tixraacayo dadka xiriirka lala sameeyay. Waad dalban kartaa qalabka baaritaanka dheeraadka ah iyo PPE inta lagu jiro mudada

baaritaanka intii loo baahdo, Waaxda waxbarashaduna waxay idin siin doontaa tilmaan dheeraad ah. Waa inaad heshaa qalab baaritaan dheeraad oo kugu filan iyo PPE ugu yaraan labo toddobaad. Tirada qalabka baaritaanka ee iskuul kasta heli doono waa la qiyaasey iyadoo lagu saleynayo tirada macalimiinta iyo ardayda iyadoo la raacayo baaritaanka maalinlaha / taxanaha ah ee la samaynayo laga bilaabo Janaayo. Qiimayntu waxay sidoo kale tixgelinaysa siduu ugu faafay faayraska bulshada deegaanka.

Waa maxay diyaargarawga gaarka ah ee keydinta loogu baahan yahay qalabka baaritaanka?

Heerkulka kaydinta aaladaha iyo kiimikada LFD waxay u dhexeeyaan 2 ° C iyo 30 ° C.

Qalabka iyo kiimikada LFD waa in lagu isticmaalaa inta u dhexeeysa 15 ° C iyo 30 ° C.

Waa maxay shuruudaha PPE ee shaqaalaha?

Shuruudaha PPE ee shaqaaluhu way kala duwan yihiin waxayna kuxirantahay shaqadooda. Dhamaan shaqaaluhu waa inay xirtaan maaskarada qalliinka u adkeysata taasoo dheecaanka(Nooca 11R). Dadka soo saara qalabyada waa inay sidoo kale xirtaan gacmagashiyada halka mar la isticmaalo (taas oo u baahan in la bedelo cashar kasta ka dib), lugagashi caag ah hal mar la isticmaalo, iyo qalabyada indhaha lagu ilaaliyo(ookiyaalaha indhaha ama wajixirka). Kaaliyaha baaritaanka iyo qofka natiijooyinka diiwaangaliya labaduba waxay u baahan yihiin gacmagashiga halka mar la isticmaalo. Shaqaalaha nadaafadda wuxuu u baahan yahay gacmagashiyada halka mar la isticmaalo iyo maro hal mar la isticmaalo(waa in la beddelaa xiliga nadiifinta hoorka) iyo ka hortagga indhaha (ookiyaalaha indhaha ama wajixirka). PPE waa in la beddelaa markasta oo xubnaha shaqaaluhu ay ka baxaan goobta baaritaanka oo ay ku soo laabtaan(xitaa inta lagu jiro kalfadhiga) ama haddii qalabyada kahortaga ay waxyeelloobaan ama wasakhoobaan.

Gaadiidka

Ka waran haddii shaqaalaha ama ardayda ay ku tagaan iskuulka ama kulleejka gaadiidka dadweynaha - masoo xaadiri karaan iskuulka ama kulleejka haddii ay galayaan baaritaanka maalinlaha ama kan taxanaha ah?

Haddii lasoo xaqiijiyo inuu xiriir dhow la sameeyay qof kiis laga helay oo jooga goobta waxbarashada, shaqsiga qaatay baaritaanka maalinlaha/taxane ah uma baahna inuu iskarantiilo, raaco xayiraadaha bulshada, ama diyaargarawga safarka ee ka baxsan xeerarka iyo tilmaamaha laga soo saaray goobta ay ku nool yihiin gudaheeda. Haddii shaqsigu uusan imtixaan qaadan karin inta lagu jiro waqtigan, tusaale ahaan, maalmaha fasaxa ama maalmaha fasaxa, waa inay is karantiilaan. Haddii muddada toddobada maalmood ah ay dhammaato usbuuca dabayaaqadiisa, shaqsigu waxaa laga rabaa inuu qaato baaritaan dheeraad oo LFD ah Isniinta soo socota.

Maxaa dhacaya haddii, duruufo gaar ah awgeed, waalidku awoodi kari waayo inuu soo qaado ilmo kiis laga helay?

Waalidiinta ama kuwa ilmaha xanaaneeyaan waa inay u diyaariyaan ilmahooda in loo qaado sida ugu dhakhsaha badan uguna macquulsan markii kiis laga helo kadib. Ardayga waa inuu xirtaa wejixirka oo uu ka fogaadaa ardayda kale ee jooga meelaha lagu nasto ee goobta waxbarashada loo asteeyay. Haddii ay suurtagal tahay, cunuggu waa inuu lugeeyaa, baaskiil ku socdaa ama ku wareegaa guriga. Ardayda aan laga helin wax kiis waa inaysan raacin gaadiidka dadweynaha markay guriga usocdaan. Maamulka deegaanka waxaa laga yaabaa inuu ku caawin doona gaari ardayda bes loogu talagalay kaas oo leh badbaado ku habboon.